

KU DAQMA XAFIIS D.



Faafin Rasmiga ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIIKA SOMALIYA

Sanadka 1

Muqdisho, ah 2 Majo 1973

L. 5

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu, ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHABA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, 18 April 1973 — Magacaabid Guddoon-
shaha Wakaaladda Dekedaha Somaliyed. L. 44.

Bog. 75

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada
Dhul, 11 April 1973 — Moxamed Khayre Xersi.
L. 35.

Bog. 77

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada
Dhul, 11 April 1973 — Xalima Tabit Cusman. L. 36.

» 77

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 17 April 1973 — <i>Cali Farax Muse.</i> L. 37	Bog. 78
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 23 April 1973 — <i>Shekh Salah Moallim.</i> L. 38	» 78
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul, 23 April 1973 — <i>Shikh Ali Xaji Cabduraman.</i> L. 39.	» 79
WASAARADDA HAWLAHA GUUD Badaalaad Naado Dhul, 12 April 1973 — <i>Moxamed Jama Kheyre iyo</i> <i>Farax Xersi.</i> L. 40	» 79
WASAARADDA HAWLAHA GUUD Badaalaad Naado Dhul, 17 April 1973 — <i>Moxamed Xaji Caxmed,</i> <i>Xusen Moxamed Cumar iyo Warsame Moxamud</i> <i>Moxamed.</i> L. 41	» 80
WASAARADDA HAWLAHA GUUD Badaalaad Naado Dhul, 17 April 1973 — <i>Cali Cali Xasan.</i> L. 42	» 80
WASAARADDA HAWLAHA GUUD Badaalaad Naado Dhul, 19 April 1973 — <i>Mohidin Abtidon Guled.</i> L. 43	» 81
WASARADDA HAWLAHA GUU Naada Dhul, 23 April 1973 — <i>Fadumo Cali Gabo.</i> L. 44	» 82
DEGMDAA BAYDHABA 3 Febrero 1973 — <i>Guddoon-</i> <i>shaha Gudiga Degmada Baydhaba Dhamme: Moxa-</i> <i>med Sa'ax Xaji.</i> L. 45	» 83

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO

W.M.

BOGGA LABAAD

XEER DOWLADEED

XEER GUDDOONSHAHAA GOLAHA SARE EE KACAANKA

18 April 1973, L. 44.

Magacaabid Guddoonshaha Wakaaladda Dekadaha Sомaliyed.

GUDDOONSHAHAA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

HADDAAN ARKAY Xaashidii Koowaad ee Towradda iyo
Xeerkii tiradiisu ahayd 1 ee 21 Oktobar, 1969;

HADDAAN ARKAY Qodobka 21d ee Sharcijii tiradiisu ahayd
1 ee 7dii Jannayo, 1973, kuna saabsanaa Wakaaladda Dekadaha
Somaliyed;

HADDAAN ARKAY Sharcigii tiradiisu ahayd 55 ee 21kii
Marso, 1970;

TALADDII Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Gaadiidka
Balda iyo Kaluunka;

G U D D O O N

Qodob 1

Sarreeye Guuto Cali Cilmi Baarre oo ka tirsan Xogga Dalka
Somaliyed waxa lagu magacaabay Guddoonshaha Wakaaladda
Dekadaha Somaliyed.

Qodob 2

Magacaabida Guddoonshaha kor ku qoran waxay ka bilaaba-
naysaa 21kii Marso, 1970kii.

Qodob 3

Laga bilaabo taariikhda magacaabidiisa, Guddoonshaha Wa-
kaaladda Dekadaha Somaliyed wuxuu lahaanayaa 2.600/- (Laba
kun lix boqql) shilin oo mushahaar ah iyo 2.000/- (laba kun) shilin
oo Gunno xil ah (Indennità di Carica).

— 76 —

Qodob 4

Waxa kale ooy Wakaaladda bixinaysaa kirada guriga Gud-dooñshuhu ku jiro.

Qodob 5

Mushahaarka, Gunnada iyo kirada gurigaba waxa laga bixinaya Miisaaniyada Wakaaladda Dekadaha Somaliyed.

Muqdisho, 18 April 1973.

SARREEYE GAAS GUDOONSHAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Maxamed Siyad Barre

XOGHAYAHA DAWLADDA
Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Kaluunka
Cisman Jamaal Cali

*VISTO e registrato - Reg. n. 1 foglio n. 21.
Mogadiscio, li 23 Aprile 1973.
Il Magistrato ai Conti:
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR*

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

D A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamed Khayre Xersi, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27 Marso 1973kii; uu weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadag, oo qiyaas rektangulare (27x13,5), kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin: Waqooyi Moxamed Warsame iyo Khasisa; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fican uga arkij karaao naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laaga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 April 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid
(L. 35)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jalle Xalima Tabit Cusman, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 4 April 1973ka, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shid, oo leh qiyaas rektangula, kuna fadhiya 40x30 (1.200) mdh.

Soohdin: Waqooyi dhul L. 353-355; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari dhul L. 358.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fican uga arkij karaao naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laaga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 11 April 1973.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid
(L. 36)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Farax Muse, u uso qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 14 Giugno 1967, uu ku weydiisayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda 21 Oktobar, oo qiyaas rektangulare (30x20) kuna fadhiya 60 mdh.

Soohdin: Waqooyi dhul L. 392; Koofur Jid; Galbeed dhul L. 402; Bari dhul 404.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fican uga arkii karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhisimaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 17 April 1973.

Maamulka Qaybta Dhisimaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid

(L. 37)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaale Shekh Salah Mocallim u uso qortay arji qaybta Dhisimaha iyo Dhulka 14-8-1972, uu ku weydiisayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda zona Bondhere, oo leh qiyaas 12,7x11,5, kuna fadhiya 146,05 mdh.

Soohdin: Waqooyi Moxamud Moxamed; Koofur Jid; Galbeed Shekh Axmed; BariJid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fican uga arkii karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhisimaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 23 April 1973.

Maamulka Qaybta Dhisimaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waaxa la caddeynayaa in Jaalle Shikh Ali Xaji Cabduraman, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 26-3-1967, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowlaadeed kuna yaal fadhiya xafadda Waberi, oo leh qiyaas rektangular, kuna fadhiya 31,3x12,4 - 388,12 mdh.

Soothdin: Waqooyi Cabdullahi Orey; Koofur Mohamed Jamac, Ga'beed Jid; Bari Yusuf Barrow iyo Haybe.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaха Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 23 April 1973.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid
(L. 39)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyhay Jaalle Moxamed Jama Kheyre Farax Xersi, kuna yaal Muqdisho, xafadda C. Latte T.G. N. 1244-66

Jaallaha kor ku magacaaban oo horay loo siiyey dhul ku yaa¹ Muqdisho, xafadda C. Latte, kuna fadhiya 900 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd B-F1244-244-67, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhuuka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Oktober, waxuuma leeyahay qiyaas rektangular 40x30, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., sochdin waxuu la leeyahay:

Waqooyi dhul L. 45; Koofur Jid; Galbeed dhul L. 47; Bari Jid. Muqdisho, 12 April 1973.

Maamulka Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid
(L. 40)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul oo ay leeyihin Jaalle Moxamed Xaji Cax-med, Xusen Moxamed Cumar iyo Warsama Moxamud Moxamed ku yaal Muqdisho, xafadda Bondere T. G. N. 1240-62

Jaalliyalka kor ku magacaaban, oo horay loo naadshay dhul ku fadhiya 900 mdh., ee laguna soo diray warqada lambarkeedii ahay MWD-2165-68 ee 17 Settembere 1968, waxaa la caddeynayaa in dhulka isaha ah, waxuu noqday dhul ku fadhiya 453 mdh. oo aan ahayn sidii hore ee kor ku dhigan, sooh dimahiisa wa sadii hore ee loo soo sheegay.

Muqdisho, 17 April 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Cali Cali Xasan, kuna yaal Muqdisho, xafadda C. Latte T. G. N. 150-67

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda C. Latte, kuna farhiya 3.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqddai tiradeedu ahayd 150-2168-68, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wukuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, wauxuuna leeyahay qiyaas rektangulare 40x30, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay:

Waqqooyi Jid 21ka Oktobar; Koofur dhul L. 629 iyo 630; Gal-beed dhul L. 622; Bari dhul L. 625.

Muqdisho, 17 April 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Mohidin Abtidon Guleed, kuna yaal Muqdisho, xafadda C. Latte T. G. N. 688-66 iyo 38-68

Jaallaha kor ku magacaaban, oo haray loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda C. Latte, kuna fadhiya 3.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu aahyd 688-2233-68 - 21-9-68, waxay sku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktobar, waxuuna leeyahay qiyas rektaguare 30x40, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay:

Waqooyi dhul L. 370 iyo 371; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari dhul L. 380.

Caddin: Waxaa la caddeynayaa in Jaallaha kor ku magacaaban in laga qaaday dan guu ahaneed dhul dhan 6.000 ee leeskugu daray ee la isiyey 1.200 mdh., sida kor ku qoran.

(L. 43)

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynaya in Jaalle Fadumo Cali Gabo, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 27-3-1973, uu ku weydiisanayey dhul' dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh qiyas rektangulare, kuna fadhiya 40x20 - 800 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari dhul L. Dawladda Hoose.

Qofkii dannaynaya wuxuu si fiican uga arkj karaao naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawla Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanti lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho 23 April 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Moxamed Cabdi Saciid
(L. 44)

DEGMADA BAYDHABA

Waxaa la sheegayaa so dhamanba dadka deggen magaaladda bayshaba in aan dheginay dhikniinkaas ee una degenaan doono 30 (sodom) casho, dikniikaas wuxuu ku sabsanyahay dhul uu so weydistay ninka magaciisu layiraado: Sacid Xusen Moxamed, Wu-xuu soo dhiktay xashidaas in uu gato dhulkaas ku yaalah Baydhaba, xafadda Jidka lug u Baxa (Tasso ay idiin caddeyneyso Tusaa-leskeda Masawarka Dhulka).

Dadka ay danj ugu girto dhamanba waxaa o shegahayaa in ay war fax faxin kahelidoonaan xafiiska Guddomiyaha Guddiga Degmada Baydhaba.

Baldhaba, 3 Febrayo 1973.

(L. 45)

Gudonshaha Guddiga Degmada Baydhaba
Dhamme: Moxamed Salax Xaji Axmed
